Siinta boliiska warbixinta markhaatiyeed markhaatiga – Maxaa xiga ka dib?

CRIMINAL JUSTICE SYSTEM CJS

Waad ku mahadsan tahay inaad noo timi. Waan qiimeenaynaa taageeradaada.

Nidaamba dembi qaadistu ma shaqeyso markhaati la'aan. Waa waxa ugu muhiimsan ee sahla in dembiilayaasha la hor keeno cadaaladda.

Hadda maadaama aad bixisay warbixin markhaati, waxa dhici karta in lagu weydiiyo inaad markhaatiga ka furtid maxkamadda horteeda.

Ma jiraan wax kale oo aan samayn karo?

Haa. Waa muhiin inaad boliiska u sheegtid:

- haddii aad wax ka tagtay ama uusan sax ahayn;
- haddii cinwaankaaga ama lambarka telefoonkaaga aad beddeshid (kiisas ayaa maalin waliba duma sababtoo ah markhaatiyada oo lala xiriiri kari waayo awgeed).
- maalmaha aadan imaan karin maxkamadda. Fadlan soo war geli sida ugu dhaqsaha badan isbeddel walba. Warkaan waxaa loo baahan yahay marka la cayimo kiiska qaadistiisa.

'Isdifaacaha' ama qareenkiisa/qareenkeeda ma la siinayaa cinwaankyaga?

Maya. Cinwaankaaga waxaa lagu qorayaa dhabarka warqadda warbixintaada markhaatiyeed, eedeysanaha ama qareekiinsa/qareenkeeda wuxuu helayaa nuqulka wejiga hore ee warqadda. Xitaa, markhaatiyada si cod dheer looma waydiiyo cinwaankooda markay maxkamadda hor joogaan. Eedeysanaha ama qareekiinsa/qareenkeeda waa loo sheegaa magaca markhaatiyada.

Maxa ku dhacaya warbixintayda markhaatiyeed?

Haddii la-tuhme lagu eedeeyo dhacdo, warbixintaada markhaatiyeed iyo wixii kalee ah marag-kac waxaa loo gudbiyaa Adeegga Xeer-ilaalinta Boqortooyada (Crown Prosecution Service) (CPS). Adeegga Xeer-ilaalinta Boqortooyada waxay ka masuul tahay inay dembi ku qaado dembiilayaasha iyadoo adeegsanaysa nidaamka dembiga ee England iyo Wales. Inkasto ay boliiska wada shaqeeyaan, misna iyaga iyo boliiska waa laba xubnood oo kala duwan.

Yaa akhrinaya warbixintayda markhaati?

Qof kasta oo ku lugley kiiska wuu akhrin doonaa warbixintaada (matal ahaan boliiska, Adeegga Xeer-ilaalinta Boqortooyada, isdifaaca iyo qaalliyayaasha ama garsoorayaasha).

Maxaa dhacaya haddu la ii hanjabo?

Waa dembi in loo hanjabo (ama la cabsi geliyo) qof markhaati ah ama qof booliska caawinaya baaritaanka. Haddii lagu dhibo ama laguu hanjabo, maxkamadda ka hor, goorta ay socoto, ama ka dib, u sheeg boliiska si degdeg ah.

Ma la ila socodsiinayaa halka uu kiiska marayo?

Boliiska iyo Adeegga Xeer-ilaalinta Boqortooyadu (CPS) waxay wanaajiyeen nidaamka sidii loola socodsiin lahaa arrimaha jira dadka dhibanayaasha ah, laakiin mar waliba suurta gal ma aha. Ogow inaad la soo xiriiri kartid boliiska goor walba haddii aad su'aal qabtid ama walwal jiro. Meesha laga xiriirayo waxay ku taallaa bogga 9 ee warqaddaan.

Waa lagu la soo xiriiri doonaa haddii lagaaga baahdo maxkamadda (laakiin waxa dhici karta in taasi noqoto muddo in door ah ka dambeysa marka aad bixisid warbixintaada markhaatiyeed sababta oo ah kiisaska oo mudda qaadata).

Dhibanayaasha waxaa caadi ahaan loo sheegaa:

- in qofkii la tuhmay lagu qaaday dembi;
- wixii ku saabsan deebaaji ama waxa ka dhacay maxkamadda; iyo
- hadduu kiisku socon waayo sabab uun awgeed.

Laakiin markhaatiyada (aan ahayn dhibanayaal) lalama soo xiriiro mar kale haddii:

- qofka la tuhmay uu qirto dembiga ama loo digo ama qirasho ka sheego maxkamadda horteed;
- aysan jirin wax cad oo lagu cambaareeyo qofka la-tumay; ama
- qof la tuhmo lama helin.

Ma inaan aado maxkamaddaa?

Waa inaad aaddaa maxkamadda hadduu isdifaacuhu:

- inkiro dembiga sheegana 'inuusan qabin dambiga'; ama
- dembiga qirto laakiinse uu inkiro qayb muhiim ah oo ka tirsan dembiga la galay kaasoo wax ka beddeli kara nooca xukunka lagu qaadayo.

Haddii lagu waydiiyo inaad aadid maxkamadda, xeer-ilaalinta iyo qareennada eedeysanuhu waxay ku waydiin doonaan su'aalo ku saabsan wixii dhacay. Waxaad fursad u heli doontaa inaad akhrisid warbixintaada markhaatiyeed si aad u xusuusatid waxaad qortay.

Haddii aad bixisay warbixin markhaatiyeed laguna waydiiyo inaad ka markhaati furtid maxkamadda, waa inaad aqbashaa. Haddii lagaa waydiiyo inaad maxkamadda timaadid, waxaa laguu soo diri doonaa:

- warqad kuu sheegaysa goorta iyo meesha aad tagaysid; iyo
- warqad wax kuu fasiraysa.

Maxaa dhacaya haddii aanan aadin maxkamadda?

Haddii uu jiro dhib ama arrin ku saabsan aaditaanka maxkamadda, waa inaad u sheegtaa qofka ku waydiiyay inaad maxkamadda aadid sida ugu dhaqsaha badan. Haddii lagaa rabo maxkamadda hase yeeshee ay jirto wax lagu rumeysto inaadan si ikhtiyaar ah maxkamadda u iman doonin, maxkamaddu waxay kuu soo diri kartaa warqad amar ah. Haddii aadan aadin sabab fiican daraadeed, maxakaddu waxay kugu helaysaa 'yasid maxkamadeed' waxana ay soo saari doontaa warqad ah ha la soo qabto.

Halkee kiiska lagu dhegaysanayaa?

Kiisaska inta badan waxaa dhegaysta maxkamadda qaalliga ama garsoore degmo oo jooga maxkamad garsoore. Dhageysiyada la hor keeno xeer-beegta waxaa la qabtaa marka kiisku yahay mid culus waxaana lagu qabtaa Maxkamadda Boqortooyada.

Yaa wax caawin kara?

Maxkamad waliba waxay leedahay Adeegga Markhaatiyada oo asturaan leh lacag la'aanna ah, oo ay maamulaan Victim Support, waadna la xiriiri kartaa inta kiiska ka horeysa. Tabaruceyaasha Adeegga Markhaatiyada ee ka tababaray waxay ku siin karaan:

- warka waxa ka dhacaya maxkamadda;
- taakulayn shaqsiyeed iyo qof aad si kasooni ahaan ula hadli kartid;
- qof kula gala maxkamadda markaad markhaati bixinaysid; iyo
- inay kugu taakulayeen inaad soo eegtid xarunta maxkamadda kiiska ka hor,haddii ay suurogal tahay aad soo eegtid qolka dacwadaha ee maxkamadda si aad u sii ogaatid waxa aad filayso waxay yihiin.

Adeegga Markhaatiyadu kaalama hadlayaan warbixinta markhaatiyeed ama ku siin mayaan wax tala ah;

Si aad u heshid Adeega Markhaatiyada xaafadaada (Witness Service), ka eeg buugga teleefoonada adigoo ka eegaya magaca maxkamadda qaaliga ama Maxkamadda Boqortooyada (Crown Court).
Ama wac, 0845 30 30 900.

Taageero dheeri ah ayaa loo hayaa qofka xasaasiga ah ama markhaati la cabsi geliyay. Haddii Qareenka Adeegga Xeer-ilaalinta Boqortooyada haddii ay la noqoto in qofku xaq u leeyahay taageerada, oo loo yaqaan 'tixgeling gaar ah', isaga ama iyada ayaa waydiin doona qaalliga ama xaakinka si loogu fasaxo taageeradaa. Tabarucaha Adeegga Markhaatiyada, boliiska iyo Adeegga Xeer-ilaalinta Boqortooyada ayaa kuu sheegi doonaa nooca tageero ee jira, boliiska ama Adeegga Xeer-ilaalinta Boqortooyaduna waxay kala hadli doonaan wixii aad u baahan tahay.

Sarkaalka ku jira warbixintaada markhaatiyeed ayaa buuxin doona faahfaahintan soo socota.

Magaca sarkaalka ku jira kiiskaaga ama qaadaya warbixintaada markhaatiyeed

Darajadiisa

Lambarka boliiska ama xarunta

Lambarka lagala xiriiro

Ii-maylka lagala xiriiro

Lambarka tixraaca kiiska

Dhigo tafaasiirtaa meel amaan ah.

Sarkaalka ku jira kiiskaaga wuu kaa caawin karaa laakiin mar walba diyaar ma aha. Haddii aad su'aal qabtid ama wax kale jiraan, waxaad wici kartaa lambarkan soo hoose.

Wax kastoo suurogal ah waan sameyn doonaa si laguu caawiyo ama laguu gargaaro.

War dheeraad ah ma ka heli kara meel kale?

Waxaad war guud oo ku saabsan nidaamka dembiyada (boliiska, maxkamadaha iyo Adeegga Xeer-ilaalinta Boqortooyada (CPS)) iyo war ka badan oo ku saabsan ahaanshaha markhaati ka heli kartaa www.cjsonline.org/witness. Ka daawo www.cjsonline.org/victims wax intaas ka badan ee ku saabsan dhibanayaasha dembiga.

UK Online waxay bixisaa galista Internet oo raqiisa oo ka bixiso in ka badan 6,000 xarumood oo ku yaalla UK. Wac 0800 77 1234 si aad u ogaatid xarunta kugu dhow.

Waxaad heli kartaa waraaqo ku qoran Bengaali, Kantooniis, Gujaraati, Bunjaabi, Hindi, Urdu, Fiyetnaamiis, Giriig, Turki iyo Carabi.
Waxaad kaloo qoraalkaa heli kartaa isagoo ku daabacan far waawayn, farta indhoolaha (Braille) ama isagoo ah cajalad dhegeysi.
La xiriir boliiska xaafadaada si aad uga heshid faahfaahin.

Home Office

BUILDING A SAFE, JUST
AND TOLERANT SOCIETY

Somali

Waxaa daabacay Home Office Communication Directorate Diseembar 2003